JAMHUURIYADDA SOMALILAND

REPUBLIC OF SOMALILAND

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
SOLICITOR GENERAL OFFICE

# FAAFINTA RASMIGA AH
# OFFICIAL GAZETTE
# ألنّشرة الرّسمية لجمهورية صوماليلاند

| | | |
|---|---|---|
| *Sannadkii 11aad* | *Cadad Gaar ah* | *Tariikhda Daabacada 26/03/2022* |

# XEERKA TAKAALIIFTA AMNIGA MADAARADA JSL
# XEER LR.61/2013

Email: garyaqaankaguud@gmail.com
Web.www.garyaqaankaguud.com

*Sannadka 2022*

*Lama iibin karo*
*Not for sale*

# REPUBLIC OF SOMALILAND

## THE PRESIDENT

REF. JSL/M/XERM/249-1598/022013

DATE 19/02/13

# XEER MADAXWEYNE Lr: 0304/022013

## Dhaqan-galka Xeerka Takaaliifta Amniga Madaarada

## Xeer Lr. 61/2013

## Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

| | |
|---|---|
| **Markuu Arkay:** | **Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;** |
| **Markuu Arkay:** | **Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;** |
| **Markuu Arkay:** | **Go'aanka Golaha Wakiilada JSL, Go'aan Lr. GW/G/KF-20/588/2013 ee ku taariikhaysan 16/02/2013 ee ay ku ansixiyeen Xeerka Takaaliifta Amniga Madaarada Xeer Lr. 61/2013;** |

**<u>Wuxuu Soo Saaray</u>**

**Dhaqan-galka Xeerka Takaaliifta Amniga Madaarada Xeer Lr. 61/2013 ee Jamhuuriyadda Somaliland.**

**Allaa Mahad Leh,**

**Axmed Maxamed Silanyo**
**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

REPUBLIC OF SOMALILAND President

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Qaranka
Qoraalkan waxa laga Diiwaangeliyey
Xafiiska Maanta 66
Lambarka: 20/02/13
Saxeex:

RECEIVED
RL: 15
20/02/2013

The Republic of Somaliland
House of Representatives
Head Quarter Hargeisa.

Jamhuuriyadda Somaliland
Golaha Wakiilada
Xarunta Hargeysa.

Ref: GWS/G/KE-20/588/2013

Date: 16/02/2013

**Ujeedo: - <u>Go'aanka Ansixinta Xeerka Takaaliifta Amniga Madaarada Xeer Lr.61/2013</u>**

| | |
|---|---|
| **Markuu Arkay** | **Qodobadda 54aad** iyo **14aad** oo si cad u qeexaya awooda jidaynta takaaliifta ee Golaha Wakiilada iyo in curinta takaaliifta ay lagama maarmaan tahay in uu xeer jideeyo |
| **Markuu Tixgeliyay:-** | Baahidda weyn ee loo qabo in kor loo qaado heerka amaanka iyo sumcadda Madaarada Somaliland, taas oo dhabadda u xaadhi karta in ay dhaqaalaha Dalka kobciso, isla markaana dhiirigelisa arimaha dalxiiska, maalgashiga shisheeye, iyo ka ganacsiga hawada Somaliland. |
| **Markuu garwaaqsaday:-** | In ay lagama maarmaan tahay in lays waafajiyo xeerarka caalamiga ah ee duulista hawada (1944 Chicago Convention) iyo xeerarka dalka ee duulista hawada si loo helo xeer hufan oo si mug leh u eegaya duruufteena tixgalina siinaya xeerarka caalamiga ah, si dhabada loogu xaadho dhismaha **Hay'adda Duulista Hawada Somaliland (Somaliland Civil Aviation Authority**). |
| **Markuu Garawsaday: -** | In aanay suurtagal ahayn duruufta hadda in kharashyada kala du-duwan ee ku baxaya adeegga qalabka lagu baadho shandadaha iyo Dadkaba laga dabooli karo Miisaaniyadda Qaranka ee 2013. |
| **Markuu Dersay:-** | Warbixintii Guddida Dhaqaalaha ee Golaha Wakiilada iyo dhamaanba Takaaliifta iyo cashuuraha laga qaado Madaarada Somaliland |

| | |
|---|---|
| **Markuu u Codeyay :** | Xeerka Takaaliifta Amniga Madaarada **Xeer Lr. 61/2013 Kal-fadhigii 20$^{aad}$ fadhigiisii 24$^{aad}$** taariikhduna ku suntanayd **2/02/2013** oo ay goob joog ahaayeen **(50)** Mudane oo ka mid ah Mudanayaasha **Golaha Wakiilada.** |

## WUXUU

Cod aqlabiyadd ah oo afartan iyo lix mudane **(46 cod)** oo gacan taag ah ku Ansixiyay **Xeerka Takaaliifta Amniga Madaarada (Xeer Lr. 61/2013)**, halka **laba (2) mudane** ka diideen, hal mudanena ka aamusay **Gudoomiyuhuna muu codayn** sida caaddada ah.

**ALLAA MAHAD LEH**

| | |
|---|---|
| ***C/risaaq Siciid Ayaanle*** | ***Md Bashe Maxamed Farax*** |
| ***Xoghayaha. Guud ee Golaha Wakiilada*** | ***Gudoomiye-ku-xigeenka1aad eeG/Wakiilada*** |

## GOLAHA WAKIILADA JSL

| | |
|---|---|
| **Markuu Arkay** | Qodobadda 54aad iyo 14aad oo si cad u qeexaya awooda jidaynta takaaliifta ee Golaha Wakiilada iyo in curinta takaaliifta ay lagama maarmaan tahay in uu xeer jideeyo |
| **Markuu Tixgeliyay: -** | Baahidda weyn ee loo qabo in kor loo qaado heerka amaanka iyo sumcadda Madaarada Somaliland, taas oo dhabadda u xaadhi karta in ay dhaqaalaha Dalka kobciso, isla markaana dhiirigelisa arimaha dalxiiska, maalgashiga shisheeye, iyo ka ganacsiga hawada Somaliland. |
| **Markuu garwaaqsaday: -** | In ay lagama maarmaan tahay in lays waafajiyo xeerarka caalamiga ah ee duulista hawada (1944 Chicago Convention) iyo xeerarka dalka ee duulista hawada si loo helo xeer hufan oo si mug leh u eegaya duruufteena tixgalina siinaya xeerarka caalamiga ah, si dhabada loogu xaadho dhismaha **Hay'adda Duulista Hawada Somaliland (Somaliland Civil Aviation Authority)**. |
| **Markuu Garawsaday: -** | In aanay suurtagal ahayn duruufta hadda in kharashyada kala du-duwan ee ku baxaya adeegga qalabka lagu baadho shandadaha iyo Dadkaba laga dabooli karo Miisaaniyadda Qaranka ee 2013. |
| **Markuu Dersay: -** | Warbixintii Guddida Dhaqaalaha ee Golaha Wakiilada iyo dhamaanba Takaaliifta iyo cashuuraha laga qaado Madaarada Somaliland |

**Wuxuu**
**Ansixiyay Xeerka Takaaliifta Amniga Madaaradda JSL**
**(Xeer Lr 61/2013)**

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD ... FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qodobka 1aad
## Eray Bixinta

Hadaan si kale loo sheegin waxaa loo jeedaa macnaha erayada Xeerka dhexdiisa sidan:

**Xeer: -** Xeer waxaa loola jeedaa Xeerka Takaaliifta Amniga Madaarada.

**Takaaliif: -** Waxa loola jeedaa waajibaadka maaliyadeed ee xeerkani jideeyey.

**Wasiir: -** Waxa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Duulista Hawada

**Socoto: -** Waxa uu xeerkani u aqoonsan yahay ruux kasta oo ka dhoofaaya Madaarada Dalka Jsl.

## Qodobka 2aad
## Magaca Xeerka

Xeerkan waxaa loogu yeedhayaa **Xeerka Takaaliifta Amniga Madaarada JSL.**

## Qodobka 3aad
## Xadka Dabaqaada Xeerka

Xeerkan waxaa lagu dabaqayaa socotada ka dhoofaysa Madaarada Dalka.

## Qodka 4aad
## Takaaliif

Waxaa ku waajib ah dhoofe kasta oo sita tigidh diyaaradeed, isla markaana leh kursi iyo miisaan u gaar ah in uu bixiyo takaaliif lacageed oo dhan ($10) toban dollar.

## Qodobka 5aad
## Gacan Ku Haynta Adeegyada iyo Ururinta Takaaliifta

1. Gacan ku haynta Ururinta Takaaliifta iyo adeega amniga Madaarada ee la xidhiidha qalabka lagu baadho shandadaha, Shaqaalaha iyo socotada waxaa ka mas'uul ah Xukuumadda, waxaanay u igman kartaa cidii ay u garato ee ku habboon.
2. Waxa la dhisayaa **Hay'adda Duulista Hawada** (Somaliland Civil Aviation Authority, SCAA) oo u xilsaaran maamulka iyo maaraynta duulimaadyada hawada Somaliland, taasi oo la wareegi doonta adeegyada Madaarada iyo ururinta Takaaliifta Xeerku jideeyey.

## Qodobka 6aad
## Ururinta iyo Qaab-xisaabeedka Takaaliifta.

1. Ururinta iyo qaab-xisaabeedka takaaliifta, waxaa loo raacayaa xeerarka maaliyada ee Dalka.
2. Habka bixinta kharashaadka waxaa jaangoynaya Wasaaradda Maaliyadda, Wasaarada Duulista iyo Hawada iyo shirkada gacanta ku haysa.

## Qodobka 7aad
## Awoodaha Hanta Dhawraha Guud ee Qaranka

Iyada oo aan waxba loo dhimayn awoodaha Hanti-dhawraha Guud ee ku xusan Xeerka hanti-dhawrka Guud iyo kuwa kale ee xeerarka Dalku jideeyeen, Hanti-dhawraha Guud wuxuu awood u leeyahay baadhista iyo dabagalka takaaliiftan.



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE

## Qodobka 8aad

### Xeer-nidaamiyaha Xeerkan

Wasiirka ayaa awood u leh inuu soo saaro Xeer-nidaamiye aan ka hor imanayn Xeerkan.

## Qodobka 9aad

### Dhaqan-galka Xeerka.

Xeerkani wuxuu dhaqangelayaa marka Golaha Wakiiladu ansixiyo, Madaxweynuhuna saxeexo, isla markaana lagu baahiyo faafinta rasmiga ah.

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL**

_______________________________

**Baashe Maxamed Faarax**
**Gud Ku-xigeenka 1aad ee Golaha Wakiilada JSL**

_______________________________



XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
SOLICITOR GENERAL OFFICE